# Siyaasadda magangelyada iyo hawlaha oggolaashada joogitaanka ee norwiijiga

**Warbixin ku saabsan xeerarka iyo marinka nidaamka magangelyada** **14.07.2017**

## Nidaamka magangelyada ee norwiijiga

Heshiiska qaxootiga ee Qarammada Midoobay ee soo baxay 1951-gii ayay Norway ku dartay sharciyadeeda. Waxaan doonaynaa in aan gudanno waajibaadkayaga caalamiga ah oo aan ka taxaddarno xaqa qaanuuniga ah ee shakhsiyaadka magangelyada codsada. Sidaas awgeedna si qotadheer ayaan uga baaraandegnaa kiisaska magangelyada:

- Qof kasta oo Norway magangelyo ka codsada kiiskiisa si gaar ah ayaa loo qiimeeyaa.
- Codsiyada waxaa looga baaraandegaa laba hay'adood. Waaxda Agaasinka Ajnebiga ayaa marka hore codsiga ka baaraandegta.
- Qofkii codsigiisa la diido waxaa loo qabtaa qareen, waxaana uu markaa qofkaasi cabasho u qaadan karaa unug cabashada loo qaato oo madaxbannaan, Guddiga arrimaha ajaaniibta.
- Qofkii uu Guddiga arrimaha ajaaniibtu diidmo siiyo waa in uu Norway ka tagaa.
    - Waxay ku laaban karaan Soomaaliya iyada oo aanay noloshooda iyo caafimaadkoodu khatar ku jirin.
    - Dawladda ayay maxkamad la fuuli karaan si ay maxkamadaha norwiijigu u qiimeeyaan in uu go'aanka laga gaaray mid sax ah yahay. Guddiga arrimaha ajaaniibta ayaa go'aaminaya in uu qofku Norway sii joogi karo inta ay maxkamaddu ka billaabanayso.

UDI

## Kiisaska aan codsadaha Norway laga siinnin oggolaasho joogitaan oo kama danbays ah ama oggolaashadii lagala noqday

Kiisas khuseeya muwaaddiniin Soomaaliya ka yimid ayaa saxaafadda norwiijiga iyo midda soomaalidaba looga hadlay. Waxaana lays weydiinayaa waxa dhacaya, sababta ay waxani u dhacayaan iyo weliba ilaa iyo inta kiis ay arrintu khuseyso. Sidaas darteed ayay mas'uuliyiinta norwiijigu doonayaan in ay arrintan faahfaahiyaan.

## Dadka aan haysan oggolaasho joogitaan oo kama danbays ah taas oo ay sabab u tahay in aanay qabin baahi magangelyo

Mas'uuliyiinta norwiijiga waxaa muhiim u ah in dadka loo oggolaanayo in ay Norway joogaan in ay yihin kuwo magangelyo u baahan. Heshiiska Qarammada Midoobay waxaa ku jira qodobbo ku saabsan mararka aanan magangelyada loo baahnayn, wuxuuna oggol yahay in ay dawladuhu la noqon karaan oggolaasho ay baxsheen. Sidaas darteedna waxay Norway dib u eegeysaa kiisaska dalalka xaaladda ammaanka-, siyaasadda- ama xaquuqda aadanaha ay is-beddeleen oo sidii hore aad uga fiican yihiin islamarkaana uu is-beddelkaasi u eg yahay mid waaraya.

Waxaa kale oo iyana dhici kara in is-beddello qof ahaaneed ay keenaan in uu qofku ammaan ahaanayo haddii uu dalkii u laabto. Waxay arrintani sidoo kale khusayn doontaa dadka qoys isu keenista ku yimid ee kiisaskan.

- Qiimayntani waxay khusayn doontaa keliya dadka haysta oggolaashada joogitaan ee ku-meelgaarka ah. Kaddib marka uu qofku saddex sano haysto oggolaashada joogitaanka ee ku-meelgaarka ah wuxuu codsan karaa oggolaasho joogitaan oo rasmi ah. Dadka haysta oggolaashada joogitaanka ee rasmiga ah waa loo oggolaanayaa in ay Norway joogaan.
- UDI waxay qiimayn ku samayn doontaa in oggolaashada lagala noqdo dadka Soomaaliya ka yimid ee oggolaashada qaxootinnimo helay ka hor 1-dii oktoobar 2014-kii, laakiin aan weli helin oggolaashada joogitaanka ee rasmiga ah.
- UDI waxay qiimayn ku samayn doontaa in ay Muqdisho hadda nabad tahay oo lagu laaban karo.
- Waxaan sidoo kale qiimayn ku samayn doonnaa in oggolaashada lagala noqonayo qofka oggolaashada qaxootinimo ku helay qof kale dartiis sida qof ay is qabaan, qof ay wada nool yihiin ama waalidka oo magangelyo qaxootinimo Norway ka helay, marka uu qofku oggolaashadaa helay ka hor 1-dii oktoobar 2014-kii.
- Ilaa iyo hadda 120 qof ayaa loo digay oo loo sheegay in laga yaabo in lala noqdo oggolaashadooda joogitaanka ee ku-meelgaarka ah kaddib marka ay Waaxda agaasinka ajnebigu qiimayn ku samayso. Tirada dadka kale ee laga yaabo in ay arrintani saamayso way adag tahay in wakhtigan xaadirka ah wax laga yiraahdo.
- Waxaan eegnaa keliya kiisaska dadka ka yimid Muqdisho.
- Kiis kasta goonidiisa ayaa looga baaraandegayaa, waxayna dadku heli karaan caawin qareen oo bilaash ah.

- Waxaan kiis kasta qiimayn doonnaa in uu qofku weli magangelin u baahan yahay, iyo in ay jiraan xaalado kale oo sheegaya in qofka loo oggolaado in uu Norway joogo, tusaale ahaan sababo bani'aadminimo oo adag.

## Dadka lagala noqday oggolaashada joogitaanka iyada oo ay sababtu tahay in ay oggolaashada joogitaanka iyo dhalashada dalka si khalad ah ku heleen

Mas'uuliyiinta norwiijigu waxay arkeen in dad hadda ka hor magangelyo codsaday oo sheegay in ay ka yimaadeen koonfurta- iyo bartammaha Soomaaliya, in ay dhab ahaantii ka yimaadeen dalalka iyo gobollada deriska ah. Shakhsiyaadkani si khalad ah ayay ku heleen oggolaashada joogitaanka, baahi dhab ahna umaanay qabin in magangelyo la siiyo. Qaar badan oo ka mid ah ayaa qaatay dhalashada norwiijiga.

- Sida uu dhigayo sharciga norwiijigu waa in aan qiimayn ku samaynaa in dadka sida khaladka ah ku helay oggolaashada joogitaanka in ay oggolaashada luminayaan. Arrintan waxaan ugu yeernaa kala noqosho.
- Marka laysu geeyo waxaa la arkay ku dhowaad 600 oo kiisas noocan ah oo khuseeya dad sheegtay in ay Soomaaliya ka yimaadeen.
- Marka la qiimaynayo kala noqoshada waxaannu eegnaa in ay jiraan sababo kale oo qofku Norway ugu sii haysto oggolaasho joogitaan. Sidaas awgeed way adag tahay in la sheego inta qof ee oggolaashada lagala noqonayo.
- Xataa dhalashada dalka ee sida khaladka ah lagu baxshay waa lala noqon karaa. La noqoshada oggolaashada joogitaanka ama dhalashada ku yimid warbixinno khalad ah oo mas'uuliyiinta norwiijiga la siiyay waa arrin khuseysa dadka ka yimid dal walba.
- Golaha shacabka ayaa bishii maajo go'aamiyay in aanay UDI go'aan ka gaari karin kiisaska la noqoshada ee ay maxkamaduhu kiisaskaas go'aamiyaan. Arrintan ayaa waxay u baahan tahay in sharciga la beddelo. Wasaaradda caddaaladda- iyo heeganka ayaa UDI iyo UNE ku amartay in aanay go'aan ka gaarin kiisaska la noqoshada dhalashada ilaa iyo inta ay taasi ka dhacayso.

### Deeqda laabashada iyo dib-ula-qabsashada Soomaaliya ee dadka aan haysan oggolaashada joogitaan

Dadka ay tahay in ay Norway ka tagaan maaddaama aanay haysan oggolaasho joogitaan, waxay codsan karaan in laga caawiyo sidii ay dalkoodi ugu laaban lahaayeen. Waxaa safarka iyo dib-ula-qabsashada dalkiiba ka caawin kara International Organization for Migration, caawintaas oo isugu jirta mid dhaqaale iyo mid baraatiko ahba. Kuwa doorta in ay Norway sharcidarro ku joogaan waxa u furan waa in khasab dalkii loogu cesho.

Soomaalida Norway waxay heli karaan caawin laabasho oo dheeri ah taas oo loo marinayo borogaraamkayaga dib-ula-qabsashada ee Soomaaliya. Borogaraamka waxaa la socda hay'adda Kaalmada qaxootiga ee Denmark. Dadkii ilaa iyo hadda laabtay iyaga oo

borogaraamkan isticmaalaya waxay sheegeen in ay xaaladdoodu degaan sugan tahay, ayna helaan dakhli iyaga iyo qoskaba faa'iido u leh.

Dadka borogaraamkan ka faa'iideysta waxay heli karaan

- tigidh diyaaradeed iyo caawin dhaqaale
- caawin dib-ula-qabsasho sida barasho xirfadeed iyo aasaasid ganacsi
- tala bixin ay ka helaan hay'adda Kaalmada qaxootiga ee Denmark
- la socosho ay hay'adda Kaalmada qaxootiga ee Denmark la socon doonto ilaa iyo hal sano kaddib marka uu qofku Soomaaliya tago. Waxaa kale oo la sameeyaa in dadka lala socdo iyada oo la kaashanayo The National Commission for Refugees and IDPs.